San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Jiilaalka 2004

Macallimiinta Khaaska ah, Fasalka Khaaska ah ee Maalinimada ee ardeyda waxbarashadda xoogaa dhibaato ah ka haysato ay dhigtaan iyo Ardeyda af Ingiriisiga baraneysa ee Waxbarashadda Khaaska ah (SPEDLEP)

Qeexida Barnaamijyada iyo Ardeyda loo Adeegay

San Diego City Schools (SDCS) waxay ardeyda xaqa u leh barnaamijyada ardeyda dhibaatada adag aan qabin u fidisaa adeegyo isdabajoog ah oo ikhtiyaariyo ah. Nidaamka waaxdu wuxuu dhigeyaa inta ay macquulka tahay inuu ardeyda lagu qoro dugsiyada deegaanka ay deggan yihiin u dhaw. Barnaamijkani wuxuu adeeg u fidiyaa ardeyda ay da'doodu u dhexeyso 5 ilaa iyo 22 sanno, waxaana adeegga lagu siiyaa nooca Barnaamijka Macallinka Khaaska ah ama nooca Fasalka Khaaska ah.

Ardeyda af Ingiriisiga Baraneysa waxaa la siiyaa fursadaha waxbarashadda khaaska ah oo ku salleysan heerka aqoontiisa af Ingiriisiga iyo qiimeynta lagu sameeyey meelaha uu u baahan yahay. Dugsiyada degmada ku yaala wuxuu barnaamijkanu adeeg u fidisa in ka badan 9,000 oo ardey.

Tirada Ardeyda ee Fasalka

Tirada ugu badan ee ardeyda Macallinka Khaaska ah uu wax u dhigi karo waa 28 ardey. Tirada ardeyda Fasalada Khaaska ah ee Maalinimada la dhigto waxay u dhexeysaa 12 ilaa iyo 18, taas oo ku xidhan sida uu fasalku isugu dhex jiro. Fasalada dugsiga dhexe iyo sare wey ka badnaan karaan tiradaas, maadaama ardeyda fasaladaas ku jirta intooda badan ay yihiin kuwo af Ingiriisiga si wacan u garaneya.

Noocyada Adeegyada Ardeyda la Siineyo

Adeegyada ardeyda loo fiidineyo waxay noqoneyaan kuwo ku salleysan jawi aan xadidneyn, waxaana lagu bilaabeyaa taageerada u bixineyo Macallinka Khaaska ah oo la socoto mida waxbarashadda guud ee fasalka dhexdiisa ah. Adeegyada ardeyda waxaa kaloo ka mid ah la-talinta, adeegyada ardeyga fasalka laga soo saaareyo, laba macallin oo wax u dhigta, xarumaha waxbarashadda, iyo fasalada khaaska ah ee maalinimada la dhigto.

OO KOOBAN

- SDCS waxay u adeegtaa in ka badan 9,000 oo ardey oo ku jirta Barnaamijka ardeyda aan Khatar weyn ee caafimaad qabin (Ardeyda leh Baahida Khaaska ah ee Waxbarashadda)
- Wax dhigistu waxay ku salleysan tahay halka la marayo iyo uruurinta macluumaadka sida ay wax u socdaan
- Waxaa ardeyda curyaamiinta ah loo fidiyaa adeegyo ka baxsan midka Ardeyda leh Baahida Khaaska ah ee Waxbarashadda (SLD)
- Taageerooyinka waxaa laga yaabaa inay ka mid yihiin macallimiin, kaaliyaasha waxbarashadda khaaska ah, La-taliyaasha waxbarashadda, aqoonyahanada cilmi-nafsiga, Aqoonyahanada cilmiga hadalka iyo luuqada, Dadka duugista wax ku daweeya, iyo xirfadleyaasha kale ee ay aqoonsan yihiin kooxda Barnaamijka Waxbarashadda Shakhsiyeed (IEP)
- Waxaa laga yaabaa inay heerka taageerada barnaamijka inay bixiyaan: Qofka Waalidiinta Hawlaha u fududeeya, Qofka cabshooyinka dabagalka ku sameeya, Barnaamijka Macallimiinta Khaaska ah ee dugsiga jooga, iyo Maamuleyaasha Barnaamijka

Manhajka

Ahmiyada manhajku waxaa weeyaan waxbarasho ku salleysan heerka la dejiyey iyo in si wanaagsan looga faa'iideysto dulucda heerarka dawlad-goboleedka iyo Hab-dhismeedka Wax akhriska iyo wax qorista ee degmada. Waxaa intaas la xidhiidha oo ay degmadu adeegsataa manhaj dheeraad ah oo loogu talagalay inuu ardeyda taageero saa'id ah siiyo, kaas oo ku salleysan cilmi-baadhis la sameeyey.

SOMALI VERSION: SDCS NON-SEVERE

-Wey socotaa-

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

San Diego City Schools
Fact Sheet

Shaqaaluhu waxay fidineyaan barnaamij dhammeystiran, waxayna kala saareyaan, isla mar ahaantaasna qiimeyn ku sameynayaan wax dhigista meelaha shakhsigu uu u baahan yahay. Qiimeynta ku salleysan wax qabadka la marayo waxaa looga faa'iideystaa in lagu ogaado macluumaadka horumarka iyo go'aan ka qaadashada habka wax loo dhigeyo. Ujeeddada barnaamijku waxaa weeyaan inay ardeydu waxbarashadda guul ka gaadhaan, taas oo loo marayo macluumaad ku dhisan wax dhigis habbeysan. Arrintaasu waxay keeni doontaa aasaas adag iyo waxbarashadda oo xawli wacan ku socota.

Xaq-u-yeelasho

Ardeyda leh Baahida Khaaska ah ee Waxbarashadda (SLD) waxay leeyihiin caqli meel dhexaad ah, waxayna muujiyaan inaysan kala garaneyn faraqa u dhexeeya kartida iyo guusha, taas oo ay sabab u tahay adeegsida hal ama in ka badan oo ah hababka nidaam darada ah ee ay u adeegsadaan, sida maqalka iyo aragga, dhibaatooyinka xusuusta ama feejignaanta. Waxaa intaas weheliya, Barnaamijka ardeyda aan dhibaatada caafimaad ee khatarta qabin wuxuu siyaabo kala duwan ugu adeegaa ardeyda deeqda lacageed ee uu dawlada-dhexe ka helo ee loogu talagalay, taas oo aysan ku jirin Ardeyda leh Baahida Khaaska ah ee Waxbarashadda (SLD) sida dhibaatooyinka caafimaad ee kale.

Meeleynta

Xaq u yeelashada inuu ardeydu ku biiro Barnaamijka ardeyda aan dhibaatada khatarta caafimaad qabin waxaa go'aankeeda iska leh kooxda IEP. Barnaamijka ardeyda aan dhibaatada khatarta caafimaad qabin wuxuu ardeyda u fidiyaa adeegyo ikhtiyaariyo ah kaas oo lagu hirgeliyo jawi aan ardeyda ku xadidneyn. Ikhtiyaariyada waxaa ka mid ah : Waxbarashadda guud oo uu Macallin Khaas ah Taageerayo (la-talin, wada shaqeyn iyo adeeg toos ah), Fasalka Maalinimada Khaaska ah oo koox yar oo ardey ah wax loogu dhigo, iyo Barnaamijyo Beddelkood ah hadba sida loogu baahdo.

SOMALI VERSION: SDCS NON-SEVERE

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinada kala xidhiidh: Macallimiinta Khaaska ah, Xafiiska Fasalka Khaaska ah ee Maalinimada ee ardeyda ay waxbarashadda xoogaa dhibaato ka haysato: (619) 725-7327
Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578 **www.sandi.net**

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."